# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/DECM/249-973/062008 DATE 23/06/08

# DECREETO MADAXWEYNE NO:345/062008

**DHAQAN-GALKA LIFAAQA WAX-KA-BEDELKA & KAABISTA**
**XEERKA DIIWAANGALINTA CODBIXIYEYAASHA EE XEER LR 37/2007**

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr.37/2007.

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-QC4/434/2008 ee 21/06/08 kuna ansixiyeen qodobada 7.4(j); 8(1&9); 10(4); 12(1&2); 12; 14(t&j); 18; 19; 22; 23;(1); 27; 28; iyo 31aad ee Xeer Lr.37/2007 ee Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyeyaasha oo soo jeedintii Madaxwaynaha JSL Golaha Wakiiladu ku meelmariyeen wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyeyasha.

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Wuxuu Soo Saaray**

*Dhaqan-galka Qodobada lifaaqa ah ee Xeerka Diiwaan-galinta cod-bixiyeyaasha ee kala ah:- Qod.* 7.4(j): 8(1&9): 10(4): 12(1&2): 12;14(t&j); 18; 19; 22; 23;(1); 27; 28; **iyo** 31aad ee Xeer Lr.37/2007 ee Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyeyaasha laga bilaabo taariikhada Degreetadan.

Allaa Mahad Leh

Axmed Yuusuf Yaasiin
Ku/simaha Madaxweynaha JSL
Ahna Madaxwayne-ku-Xigeenka JSL

## Go'aanka ansixinta Lifaaqa, Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha

( Xeer Lr. 37/2007 )

### *Golaha Wakiiladu*

*Markuu Arkay:* Qodobadda **4aad** faq(**1**), **8aad** faq(**1**), **9aad** faq(**1**), 22aad faq(**2**) ee Dastuurka J.S.L

*Markuu Dersay:* Soo jeedinta Golaha Guurtida ee ku aadan mashruuc sharciga **wax ka Bedelka & Kaabista** ee Xeerka **Diiwaangelinta cod-bixiyayaasha** Xeer **Lr.37/2007**.

*Markuu Ka Dooday:* Nuxurka ay Xambarsan tahay soo jeedinta Golaha Guurtida ee wax ka bedelka & kaabista mashruuc sharcigan

*Markuu qiimeeyey:* Heshiiska Asxaabta Qaranka iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee keenay soo jeedinta Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelint Codbixiyayaasha, ogaadayna in baahi weyn loo qabo wax-ka-bedelkan.

*Markuu Tixgeliyey:* Duruufeheena la Xidhiidha geedi socodka Dimuqraadiyada iyo suurogelinta diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha si loo helo doorasho u dhacda cadaalad, Fahmayna in wax ka bedelkani saamaynayo oo keliya labada doorasho ee Madaxtooyada iyo Dawladaha Hoose ee soo socda.

*Markuu Garowsaday:* Baahida loo qabo in laga taxadiro dib-u-dhac dambe oo ku yimaada isdiiwaan gelinta codbixiyeyaasha & qabsoomidda doorashooyinka **Goleyaasha Deegaanka & Madaxtooyada.**

*Markuu u Codeeyey:* Ansixinta Lifaaqa wax ka bedelka & kaabista Xeerka Diiwaangelinta codbixiyeyaasha Xeer **Lr.37/2007,** fadhigiisii **21/06/2008**, oo ay goobjoog ahaayeen **42** Mudane.

## *Wuxuu*

Cod aqlabiyad ah **( 29cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay lifaaqa wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha **Xeer No.37/2007** oo dhaqan gal kiisu ku eegyahay doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka ee soo socda oo keliya, halka ay ka diideen **(8) Mudane**, kana aamuseen **(4) Mudane**, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah

*ALLAA MAHADLEH*

***Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi(Cirro)***
***Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.***

***Maxamed Xassan Kaahin (Kayse)***
***Xog.Guud ee Golaha Wakiilada.***

## QODOBKA 1AAD

## SAAMAYNTA XEERKAN WAX-KA-BEDDEL.

Wax-ka-beddelkani waxa uu saamayn KMG ah oo laalis ah ku samaynayaa qoddobada Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha ee kala ah 7.4(j): 8(1 &9);10(4);12(1&2);13;14 (t&j);18;19;22;23(1):27;28 iyo 31; isla markaana wuxuu qeexayaa Qodobadda Xeer ee halkoodii lagaga dhaqmayo si loo hir-geliyo diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha ee ugu horaysa.

## QODOBKA 2AAD
## HAB-RAACA GEEDI-SOCODKA DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYAYAASHA IYO SUGIDA MUWAADINIMADA.

QODOBKA 7.4 EE XEERKA DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYAYAASHA waxa lagu bedelayaa Qoddobkan 2aad ee wax-ka-beddelkan, ahna sidan:-

1. Geedi-socodka Diiwaan-gelinta cod-bixiyayaashu waxa uu ka koobnaan doonaa saddex mar-xaladood oo is daba-joog ah, lagana hir-gelin doono Gobol kasta oo Dalka ah xilli u gaar ah.

2. Saddexdaa marxaladood waxa ay kala yihiin:-

b) Marxaladda diyaar-garowga.

i. Marxaladdani waxa ay noqonaysaa muddo aan ka yarayn 25 maalmood oo Muwaadiniinta Gobol-kasta lagu wacy-gelinayo in ay u diyaar-noqdaan Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha;

ii. Xilligaa lagu jiro marxaladdan diyaar-garowga ah, xafiisyadda Diiwaan-gelinta ee Degmo kasta, waxa la dhigayaa foomam loogu tallo galay Dadweynaha, oo Is-diiwaan-geliyuhu ku qorayo Macluumaadka looga baahan yahay diiwaan-gelinta; sidoo kalena waxa dad-weynaha lagu wacyi-gelinayaa, tilmaamana laga siinayaa sidii ay ugu diyaar-garoobi lahaayeen marxaladda xigta ee geedi-socodka Diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha.

t). Marxaladda Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha ee rasmiga ah:-

i. Marka ay dhammaato mar-xaladda diyaar-garowgu, waxa ku xigi doona muddo aan ka yarayn 5 maalmood oo ay Gobol kasta tagayaan kooxo hawl-wadeeno ah, tiradoodana uu goynayo Komiishanku, kana kooban sida ku cad Qoddobka 7aad faqraddiisa 3aad ee Xeerka diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, si ay u hir-geliyaan diiwaan-gelinta rasmiga ah ee Cod-bixiyayaasha labadda doorasho ee soo-socda. Sidoo kalana halkaasi (goobtaasi) waxa muwaadinka shuruudaha buuxiyey lagu siin doonaa Kaadhka Muwaadinimadda iyo Kaadhka cod-bixinta;

ii. Haddii Maalinta ugu dambaysa ee diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha ay soo hadhaan dad aan la diiwaan-gelinin, Komiishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu qaadayaa tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo in la diiwaan-geliyo dadka jooga Goobta ka hor waqtiga la xidhayo diiwaan-gelinta.

iii. Goobihii cod-bixineed ee doorashadii u dambaysay, waxay noqonayaan goobo diiwaan-gelineed. Hase-yeeshee Komiishanka Doorashooyinka Qaranku wuxuu awood u leeyahay in uu sammeeyo goobo cusub ama in uu goobihii hore u jiray u raro ( beddelo) meelo kale si loo de-dejiyo geedi-socodka diiwaan-gelinta.

j). Marxaladda Dhammaystirka Diiwaan-gelintu waxa ay ahaanaysaa mid daba socon doonta marxalladda diiwaan-gelinta rasmiga ah, soconna doonta muddo dhan 15 maalmood oo koox hawl-wadeeno ahi ka hawl-galayaan Xafiis kasta oo diiwaan-gelineed oo heer-degmo ah, si ay xogaha diiwaan-gelinta la xidhiidha uga soo qaadaan muwaadiniinta ka soo gaadhi waayay waqtigii Marxaladda diiwaan-gelinta rasmiga ahi socotay.

QODOBKA 3AAD

NIDAAMKA DIIWAAN-GELINTA RASMIGA AH.

Qodobkani waxa uu bedelayaa Qodobadda 12(1&2), 18 &19 ee Xeerka Diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha, waana sidan:-

Waa in la raaco dhammaanba tallaabooyinka soo socda marka la sammaynayo Diiwaan-gelinta rasmiga ah, una kala horeeya sidani:-

b) Masuulka Wasaaradda Arrimaha Guduhu;

i. Wuxu waydiinayaa qofka in uu yahay muwaadin Somaliland ah, xaqiijin ka dibna waxa uu Wakiilka Maxkamaddu ku dhaarinayaa hortiisa, Muwaadin kasta oo is-diiwaan-gelinaya, da'diisuna ka yaraanayn 16 sanno Maalinta loo qorsheeyay ***Doorashada Madaxtooyada***.

ii. Mas'uulka Wasaaraddu haddii uu ku qanco Jawaabta uu ka hello Isdiiwaan-geliyaha waxa uu u ogolaanaya in diiwaan-gelinta qofkaasi muwaadinimadiisu sugantay la sii wado.

t) Hawl-wadeenka Komiishanka Dooarshooyinku waxa uu isagoo adeegsanaya ***Kombuyuutarka Lap-tobka*** ah, ka qorayaa is-diiwaan-geliyaha xogta isaga la xidhiidha ee uu qeexayo Qoddobka 8aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, sidoo kalena waxa uu sawir elektaroonik (Electronic) ah, ka qorayaa is-diiwaan-geliyaha xogta isaga la xidhiidha ee uu qeexayo Qoddobka 8aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, sidoo kalena waxa uu sawir electroonika (Electronic) ah iyo farahaba ka qaadaya is-diiwaan-geliyaha oo uu kombuyuutarka gelinaya.

j) Is-diiwaan-geliyaha, waxa loo akhrinayaa xogta laga qoray waana in la hubiyo in uu ogolaaday, ka dibna diiwaan-geliyuhu waxa uu ku xafidaya Kombuyuutarka.

x). Mas'uulka Diiwaan-geliyaha ahi waxa uu ka soo saarayaa Kombuyuutarka;-

i. Laba nuqul oo isku mid ah, oo ah foomka diiwaan-gelinta, kuwaasi oo mid la siin doono Wasaaradda Arrimaha Gudaha ka kalena noqon doono diiwaanka Diiwaan-geliyayaasha.

**ii. Kaadhka Muwaadnimadda iyo Kaadhka cod-bixinta doorashada.**

Kh). Mas'uulka ka socda Komishanka, ahna Guddoomiyaha Goobta, ayaa saxeexaya kaadhka cod-bixinta, halka uu mas'uulka ka socda Wasaaradduna uu saxeexi doono kaadhka muwaadinimadda. Labadda mas'uul waxa kale oo ay saxeexayaan labadda nuqul ee foomka diiwaan-gelinta. Is-diiwaan-geliyuhuna waa in uu suulka bidix dhigo ama saxeexo labadda foom iyo weliba **kaadhka cod-bixinta doorashada iyo kaadhka Muwaadinimadda.**

d) Is-diiwaan-geliyaha waa in far-yaradda bidix ee gacanta loo geliya khadka aan masaxmin, haddii ay maqan tahayna far-yarta midig ee gacanta. Haddii ay labadduba maqan-yiheinna laga mariyaa khadka meel uu ka muuqan karo oo jidhkiisa ah.

r). **Is-diiwaan-geliyaha waxa isla - goobtaasi lagu siinayaa kaadhka muwaadnimadda iyo kaadhka cod-bixinta doorashadda.**

QODOBKA 4AAD
NIDAAMKA DHAMMAYSTIRKA DIIWAAN-GELINTA

Qodobkani waxa uu beddelayaa oo uu halkiisii gelayaa, Qodobadda 12(1& 2), 18 & 19. Sidoo kalena waxa uu wax ka bedelayaa Qodobka 14aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaash,a waana sidan:-

1. Nidaamka loo racaayo hir-gelinta marxalladda dhammaystirka diiwaangelintu waxa uu noqonayaa nidaam la mid ah ka loo raacay hir-gelinta Marxaladda diiwaan-gelinta rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha. Hase yeeshee is-diiwaan-geliyaha, isla marka la diiwan-geliyo la siin maayo kaadhka codbixiyaha iyo kaadhka muwaadinka, halkoodii waxa laga siinayaa nuqul daabacan oo muujinaya xogtii isaga/iyada laga buuxiyay ee la geliyay kombuyuutarka;

2. Marka uu Komiishanku soo af-jaro hubinta in aanay jirin dad hal mar in ka badan is diiwaan-geliyey, ayaa kaadhka cod-bixinta iyo kaadhka muwaadinimadda laga siinayaa is-diiwaan-geliyaha, isla xafiiskii uu hore isaga diiwan-geliyey , isagoo la imanaya halkaasi nuqulkii daabacnaa ee laga siiyay Xafiiska Diiwaan-gelinta Degmadda;

3. Muddada lagu jiro marxaladda dhammaystirka Diiwaan-gelinta lama dabaqayo xarfaha **(t) iyo (j) ee Qodobka 14ad ee Xeerka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha,** marka la diiwaan-gelinayo, waa in uu muwaadinku cayimo goobta uu jecel yahay in uu ka coddeeyo, taasi ayaana lagu Diiwaan-gelinayaa Foomka diiwaan-gelinta iyo labada kaadhba, halkaasi ayuun baanu muwaadinkaasi ka dhiibanayaa codkiisa Maalinta Doorashada, meel kalena ka coddeyn maayo.

QODOBKA 5AAD
FOOMKA DIIWAANGELINTA,

Qodobkani waxa uu wax-ka-beddel ku sammaynayaa, isla markaana kaabaya qoddobada, 8,(7 & 9) iyo 31(4 & 5), waana sidan;-

Lambarka Diiwaan-gelinta u gaarka ah ee lagu xusay Qoddobka 8aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaashu waa inuu la mid yahay kuwa u gaarka noqonaya  kaadhka cod-bixiyaha iyo kaadhka muwaadinka.

QODOBKA 6AAD
XIDHISTA DIIWAAN-GELINTA

Qoddobkani waxa uu kaabayaa oo habeynayaa Qoddobada **27 & 30 ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixyayaasha, waana sidani.**

b). Mar haddii ay Gobollada ka dhammaato marxaladda dhammaystirka Diiwaan-gelintu ma jirayo qof dambe oo la diiwaan-gelinayaa.

t). Waxa diiwaan-gelin la samayn doonaa uun ka dib marka ay dhaamaadaan Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanada iyo ta Madaxtooyada ee xilligani 2008/2009.

j). Komiishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ku dhawaaqaya wakhtiga dambe ee Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha dib loo furayo.

QODOBKA 7AAD
KU DHAWAAQIDDA WAKHTIGA DIIWAAN-GELINTA
(REGISTRATION CALANDER)

Qoddobkani waxa uu wax ka beddelayaa Qoddobka 12aad (3) ee Xeerka  Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, waana sidan:-

Kalalka (Wakhtiyada) Diiwaan-gelinta Gobollada waxa ku dhawaaqaya oo faafinaya Komiishanka Doorashooyinka Qaranka, isagoo adeegsanaya aaladaha war-baahineed ee Dalka ka jira, waana in uu xil gaar ah iska saaro Komiishanku, si uu u xaqiijiyo in muwaadiniinta Gobol kasta ogaaddaan kalka/wakthiga loo cayimay gobolkooda, inay ka qabsoonto diiwaan-gelinta cod-bixiyayaashu.

QODOBKA 8AAD
NIDAAMKMA LOO ILAALINAYO QALABKA DIIWAANGELINTA

Qodobkani waxa uu bedelayaa oo uu halkoodii gelayaa Qodobada 22 iyo 23(1) ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, waana sidan:-

1. Muddada lagu jiro marxladda Diiwaan-gelinta Rasmiga ah, dhammaanba Qalabka iyo agabka kale ee loo adeegsaday Diiwaan-gelinta iyo waliba natiijada ka soo baxday hawsha la qabtay

maalintaasi, waxa meel ammaan ah ku xafidaya oo hayntooda u xilsaaran masuulka uu Komiishanku Doorashooyinku u xilsaaro hawshaasi iyada ah.

2. Maalin kasta bilawga iyo dhammaadka hawsha diiwaan-gelinta ee maalintaasi, waa in ay hawl-wadeenadu buuxiyaan foomka bilawga hawsha iyo foomka la gelinayo natiijada hawsha maalintaasi la qabtay. Dhammaan mas'uuliyiinta ku hawlan hawsha diiwaan-gelinta iyo waliba Wakiilada Xisbiyada Siyaasiga ah waa in ay wada saxeexaan foomamkaasi oo dhan.

3. Marka ay dhammaato Marxaladda diiwaan-gelinta Rasmiga ah ee Gobolku, qaabka loo gudbinayo foomamka loo adeegsaday diiwaangelinta, war-bixinaha geeddi-socodka diiwaan-gelinta iyo xogaha electroonikada ku diiwaangashanba, waxa habka loo keydinayo tilmaan ka bixinaya Komiishanka doorashaooyinka Qaranka.

QODOBKA 9AAD
GUDBINTA CABASHOOYINKA MUWAADINIINTA.

Qoddobkani waxa uu beddelayaa oo halkiisii gelaya Qoddobka 28aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, waana sidani;-

Ka hor Maalinta ay dhacayso doorashada hore, Komiishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu goob kasta oo cod-bixineed geynayaa foomam loogu talo galay, in muwaadiniintu ku soo gudbiyaan wixii cabasho ah ee la xidhiidha Diiwaan-gelinta, kuwaasi oo komishankuna ka go'aan gaadhayo ka hor Doorashada labaad.

## QODOBKA 10AAD
### DAABACAADDA IYO SOO BAN-DHIGIDDA LIISASKA

Qoddobkani wuxuu wax ka beddel ku samaynaya Qoddobka 27aad ee Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, waana sidani:-

a). Liiska Muwaadiniinta iska-diiwaan-geliyay Goobaha, kana coddayn doona oo daabacan kuna daabacan waraaqaha Rasmiga ah ee Komiishanka Doorashooyinka Qaranka, lehna Shaanbadda Xafiiska waa in lagu dhajiyaa Goob doorasho-kasta oo cod-bixineed laba bilood gudahood Maalinta Doorashada loo muddeeyay in la qabto.

b). Qodobada 13aad, 27aad iyo 28aad ee Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha laguma dabaqayo diiwaangelinta Codbixiyeyaasha Doorashada ugu soo horreysa, marka laga reebo wixii laga soo qaatay qodobadaasi ee ku jira lifaaqan.

## QODOBKA 11AAD
### XEERKA HAB-DHAQANKA (CODE OF CONDUCT)

b). Wixii Faah-faahin ah ee ku saabsan geeddi-socodka Diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha, goorta uu bilaabmayo ololaha doorashada ugu soo horeysa, xal-ka-gaadhista cabbashooyinka xisbiyada siyaasiga ah iyo muddada u dhaxaynaysa Doorashooyinka 1aad iyo 2aad ee soo-socda, waxa go'aaminaya heshiis ay wada gelayaan Komiishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Xisbiyada Siyaasadu.

t). Heshiiska ku xusan Xarafka (b) ee Qoddobkani, waxa uu noqonayaa xeer hab-dhaqan oo ka mid noqonaya Xeerarka lagu dhaqayo geeddi-socodka diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha ugu soo horreysa.

## QODOBKA 12AAD
### MUDDADA LAGU DHAQMAYO LIFAAQAN XEER.

Lifaaqan Xeer waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Golaha sharci-dejintu, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland-na saxeexo.

*Allaa Mahad Leh*

*Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi(Cirro)*
*Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.*

*Maxamed Xassan Kaahin (Kayse)*
*Xog.Guud ee Golaha Wakiilada.*